

Mashruuca manhajka cusub ee cilmiga bulshada ayaa diyaar u ah tijaabin

Aabriil 26, 2024 Weydiimaha warbaahinta ([Media inquiries](#))

Ardayda dugsiyada hoose iyo macalimiinta waxay ka faa'iidaysan doonaan manhajka barashada bulshada ee K-6 oo la cusboonaysiiyay iyo agabka cusub ee fasallada deyrta 2024.

Dowladda Alberta waxay sii waddaa inay casriyeyso nidaamka waxbarashada iyo horumarinta guusha ardayda iyadoo horumarinaysa manhaj kaxayn doona xiisaha waxbarashada. Laga soo bilaabo Agoosto 2023, dawladda Alberta waxay la shaqaynaysay waalidiinta, macalimiinta, lahawlgalayaasha waxbarashada iyo khabiirada manhajka si ay u horumariyaan manhaj cusub oo daraasaadka bulshada ee K-6 kaasoo diiradda saari doona dhisidda xirfadaha fikirka muhiimka ah iyo xoojinta ardayda inay noqdaan muwaadiniin qayb ka ah.

"Aad ayaan ugu hanweynahay shaqada ka soo baxday horumarinta manhajkan cusub ee cilmiga bulshada ee K-6, waxaan ku faraxsanahay inaan arko sida ay fasalka ugu wareegayso iyada oo loo marayo tijaabada dayrta. Waxaan rajeynayaa inaan sii wadno wadashaqeyn dheeraad ah oo aan la yeesho hoggaamiyeyaasha dugsiya iyo macalimiinta inta aan sii wadno shaqadeena si aan u dhisno manhaj dhamaystiran oo dhisa ardayda fekerkooda muhiimka ah, xallinta dhibaatooyinka iyo xirfadaha go'aan qaadashada, awoodna siinaya inay noqdaan muwaadiniin firfircoon."

Demetrios Nicolaidis, Wasiirka Waxbarashada

Isbeddelka nuxurka

Iyada oo ku saleysan jawaab celin ka timid ka qaybgal ballaaran oo lala yeeshay Dadka reer Alberta iyo la hawlgalayaasheeda waxbarashada siddeeddii bilood ee la soo dhaafay, iyo sidoo kale cilmibaarista iyo hababka ugu wanaagsan ee laga soo qaatay gobolada kale, Waxbarashada Alberta waxay soo saartay manhaj qabyo ah oo K-6 ah oo la cusboonaysiiyay si uu uga caawiyo maamulka dugsiya iyo macalimiinta inay u diyaargarobaan ikhtiyaarka ah. Tijaabada fasalkana, laga bilaabo Sebtembar. Qoraalka qabyada ah ee manhajka waxa loo habeeyey:

- xoojinta fursadaha dhiirigeliya horumarinta xirfadaha fikirka muhiimka ah, oo ay ku jiraan cilmibaarista iyo xirfadaha falanqaynta, inta lagu jiro manhajka;

- Kor u qaadida horumarinta xirfadaha la xiriira fikradda muwaadinimada firfircoon;
- Wax ka qabashada jawaab celinta ku saabsan habboonaanta korriinka iyo culayska;
- ka qayb galka ardayda waxbarashada kor u qaadaysa fahamka kala duwanaanshaha guud ahaan Kanada iyo adduunka oo dhan, oo ay ku jiraan Qaramada Koowaad, Métis, Inuit iyo taariikhda dadka ku hadla franciiska, wax ku biirinta iyo aragtiyaha; iyo
- Waxay ka tarjumaysaa kobaca ardyada iyada oo loo marayo horumarka barashada ee ka fidaya khibradaha shakhsi ahaaneed ilaa bulshooyinka iyo wixii ka baxsan.

Tijaabinta fasalada

Dowladda Alberta waxay bixinaysaa dabacsanaan ku saabsan sida maamulka dugsigu uga qaybqaato tijaabada fasalka ikhtiyaariga ah, oo ay ku jiraan darajooyinka qayb ka ah tijaabada iyo inta natiijooyinka waxbarasho ee heli doona jawaab celin. Inta lagu jiro nidaamka tijaabada, macalimiinta waxaa la siin doonaa macluumaadka iyo qalabka ay u baahan yihiin si ay ula shaqeeyaan manhajka qabyada ah ee fasaladooda, oo ay ku jiraan:

- maalmaha fasaxa macalinka si ay u taageeraan qorsheynta iyo diyaarinta tilmaamaha;
- barashada iyo baridda agabka;
- fursadaha waxbarashada xirfadeed; iyo
- fursadaha lagu bixinayo jawaab celinta Waxbarashada Alberta ee ku saabsan manhajka qabyada ah, oo ay ku jiraan sida ay khibradda ugu leedahay fasallada.

Macallimiintu waxay heli karaan agab waxbarasho dhammaystiran iyo taageerooyin waxbarasho xirfadeed oo la jaan qaadaya manhajka qabyada ah, oo ay ku jiraan dulmar maaddo gaar ah, fiidiyowyo tixraac degdeg ah, tusaaleyaal sawir qaade ah iyo xaashida xaqqi qda khaddka tooska ah ee onlayn ka.

Waxbarashada Alberta waxay tixgelin doontaa dhammaan jawaab celinta tijaabada fasalka si loo dhammeeyo manhajka cusub ee cilmiga bulshada ee K-6 ka hor intaan la hirgelin. Si aad uga qaybgasho tijaabada fasalka inta lagu jiro sannad dugsiiyeedka 2024-25, maamulka dugsiga waxaa la waydiin doonaa inay muujiyaan xiisahooda May 15.

Xaqqi qooyin degdeg ah

- Miisaaniyadda 2024 waxay bixisaa \$34 milyan doolar si ay u taageerto tijaabinta manhajka iyo hirgelinta sannad dugsiiyeedka 2024-25.
- Iyada oo qayb ka ah habka ka qaybgalka manhajka, Waxbarashada Alberta waxay sidoo kale soo ururisay jawaab celin si loo cusboonaysiiyo amarka wasaaradda ee *Waxbarashada Ardayga iyo Qaab dhismeedka Hagidda ee Naqshadeynta iyo Horumarinta Manhajka Fasalka 12*.

- Amarka cusub ee wasiirku wuxuu diiradda saarayaa waxbarashada shaqada, aqoonta iyo horumarinta xirfadaha, barnaamijyada waxbarashada iyo u diyaarinta ardayda inay noqdaan muwaadiniin firfircoon oo hawlkar ah.
- *Qaab dhismeedka* cusub ee hagitaanku waxa uu xooga saarayaa luuqada loo dhan yahay iyo matalaada codadka kala duwan, waxa ku jira nuxurka la jaanqaadaya manhajka cusub oo meesha ka saaraya tixraacyada barbaarinta.

Xogaha la xiriira

- Qabyada K-6 Manhajka Barashada Bulshada ([Draft K-6 Social Studies Curriculum](#))
- Ka dhiibo fakarkaaga ([Have your say](#))
- Amarka Wasiir ee Waxbarashada Ardayga ([Ministerial Order on Student Learning](#))
- *Qaab dhismeedka Hagaha ee Nakhshadeynta iyo Horumarinta Xanaanada ilaa Fasalka 12 ee Manhajka* ([Guiding Framework for the Design and Development of Kindergarten to Grade 12 Curriculum](#))
- Ilaha macalinka iyo taageerada waxbarashada xirfadeed ([Teacher resources and professional learning supports](#))

Wararka la xiriira

- Qabyo qoraalka manhajka cilmiga bulshada: Ku biir wada hadalka ([Draft social studies curriculum: Join the conversation](#)) (Maarso 14, 2024)
- Mudnaanta dadka reer Alberta ee manhajka cilmiga bulshada ee Cusub ([Albertans' priorities for new social studies curriculum](#)) (Dis. 14, 2023)
- Kala hadalka dadka reer Alberta manhajka cusub ee cilmiga bulshada ([Talking to Albertans about new social studies curriculum](#)) (Sebt. 18, 2024)

Warbaahinta kala duwan

- Daawo wararka shirarka ([Watch the news conference](#))

Weydiimaha warbaahinta

Kevin Lee

587-785-4366

Xoghayaha saxaafadda, Waxbarashada Alberta